

Waa sidatan hab-shaqaynta [SSPF] – Wadashaqaynta maamullada dugsiyada, maamullada adeegga bulshada, ciidanka booliska iyo maamullada goobaha wakhtilummiska

Haddii warqadaan gacanta laga saaray, macneheeda waxay tahay in dadyoow tiro badan ay ka walwalsan yihiin xaaladda uu ubadkaaga ku sugan yahay. Sidoo kale, waxaanu nahay dadyoow tiro badan oo wadashaqeyya oo ku talo jiro in uu sida ugu wanaagsan arrintaan idinka caawiyo.

Haddii wadajir ugu hawlgalno arrintaan wuxuu ubadkaaga naga heli doonaa taageero heer sare ah, laakin waa haddii idinku aad hoos ka saxiixdaan foomka oggolaanshada (eeg bogga 2aad).

Wixii su`aallo ama aragti ah oo xiriir la leh oggolaanshada waxaad kala xiriiri kartaan iskuduweyaasha [SSPF]. Iyaga ayaa ka heli doontaan warbixin dheeraad oo ku saabsan oggolaanshada iyo sida hawlgal arrinta looga qaban doono.

Dowladda hoose Östersund

[SSPF] waa madal laysku waydaarsado xogta xiriir la leh dhallinyarada ku nool degmada Östersund

Kooxda [SSPF] loogu talagalay waa ilmaha, dhallinyarada da`dooda u dhaxayso 12 ilaa 16 sano. Saldhigga waa wadashaqaynta maamullada dugsiyada, maamullada adeegga bulshada, ciidanka booliska iyo maamullada goobaha wakhtilummiska. Laakin waxaa xaaladaha qaarkood dhici karto in qolooyin kale ay arrinta lug ku yeeshaan, waa haddii lagarmaan ay noqoto oona oggolaansho xilhaayaha xannaanadda/waalidka laga helo.

Aragtida laga midaysan yahay oo xiriirka la leh caawinaadda ilmaha

Iyadoo la adeegsanayo [SSPF] ayaa waxaa la hirgeliyaa hawlgallo midaysan oo xiriir la leh ubadkaaga. Iyadoo lagu salaynayo aragti midaysan oo ku saabsan ubadkaaga, waxay dadyoowga arrinta ku mashqulsan heli karaan fursad ay ku soo bandhigaan caawinaad wanaagsan, sidii loogu hortegi lahaa in ubadkiinna uu ku dhaco xaalad aan wanaagsanayn.

Xilhaayaha xannaanadda/waalidka ayaa xal u hela arrinta sirta xirfadda

[SSPF] waxay ku salaysan tahay in xilhaayaha xannaanadda/waalidka u iyadoo qoraal ah ku muujiyo oggolaanshada in hawl wadeneyada saddexda hay`ado, ay xal ugu helaan sirta xirfadda oona ka xaajoodaan arrinta cunugga. Dhaqdhaqaaqa goobaha wakhtilummiska kama hirgalo xajinta sirta xirfadda.

Oggolaanshada is-waydaarsashada xogta – foomka

Xilhaayeha xannaanadda/waalidka

Waxaan oggolahay in maamullada dugsiyada, maamullada adeegga bulshada, ciidanka booliska iyo maamullada goobaha wakhtilummiska ka wadashaqeyaan baahida carruurtayda. Waxaan raali ka ahay in hay`adaha kor ku xusan is-waydaarsan karaan wixii xog ah oo ku saabsan ubadkayga iyadoo xajinta sirta xirfadda aysan caqabad u noqon.

Oggolaanshadayda waxay ku saabsan tahay oo **keliya warbixinta** lagamaarmaanka u ah wadashaqaynta hay`adaha sidii ugu wanaagsan ay ubadkayga ku caawini lahaayeen.

Oggolaanshada waxay hirgalaysaa laga bilaabo _____ ama ilaa wax kale lagu heshiiyo.

Oggolaanshadayda markii aan doono ayaan dib ula noqon karaa.

Goobta iyo taariikhda: _____

Saxiixa xilhaayeha xannaanadda/waalidka:

_____/_____

Magacyada oo saddexan:

_____/_____

Tal: _____ Mob: _____

Tal: _____ Mob: _____

Magaca cunugga: _____

Tobbanka lambar aqoonsiga ee
cunugga: _____